


Binken zorgen voor elkaar!



Sidee loo isticmaalaa maaskarada afka?

GOORMA?

Maaskarada afku waxa ay celisaa dhibcahaqooyaanka afka kuwaas oo haddii kale aad firdhin lahayd, tusaale ahaan marka aad qufacayso ama aad hadlayso. Sidaas ayaad u badbaadinaysaa dadka kale ugana ilaalinaysaa in aysan ku faafin walxaha deegaanka aad joogto.



Marka xiriir la isku dhawaanayo uu jiro, haddii aadan ilaalin karin masaafad dhan 1.5 mitir.



Laga bilaabo 12 sano waa waajib marka la raacayo gaadiidka dadweynaha.



Waa lagu talinayaa marka la joogo goobaha dadku ku badan yihiin.



Waa lagu talinayaa marka la gu jiro dukaammadawaaweyn (Supermarkt) ama dukaammada kale.



Marka la booqanayo dadka nugul. Ma tahay bukaan halis u ah cudurada, xiro mar kaas mar kasta oo bannaanka aad aadayo.

DHAQIDDA IYO KAYDINTA?

Dhaq maaskaradaada ka hor isticmaalka u horeeya. Nadiifi (Steriliseer) maalin kasta. Nadiifi 4 saacadood ka dibba haddii aad xoog u isticmaasho, tusaale ahaan haddii wax badan aad hadlayso.



Ku dhaq maaskarada ugu yaraan 60°C ilaa 30 daqiiqo ama ku kari waqti yar dhari karaya. Dharigan wax kale ha u isticmaalin.



Maaskarada ku feeree heer-kul sare.



Maaskarada si ficcan u qalaji, marnaba iyada oo qoyan ha isticmaalin. Ku kaydi meel xiran waxana ugu ficcan in aad ku riddo kiish maro ah la dhaqi karto.



Qaybta hoose ee maaskarada waxa ku taalla meel filterka loogu talagalay sida (filterkabunka, warqddajikada). iska hubi in filterku aad u cuslayn, maadaama uu dhibi karo neefqaadashada.



- Inta ay suurto gal tahay yaree maaskarada afka in aad marba iska saarto oo aad ku ceshato. Xiro haddii ay suurto gal tahay marka aad guriga ka baxayso.
- Haddii aad u baahato in aad maaskarada wax yar iska saarto (tusaale ahaan in aad wax cabto), markaas kor saar meel nadiif ah oo si fudud aad u nadiifin karto ama kurid kiish hawada gudbin kara.
- Maaskaradaada ha galinin talaagadda (frigo) ama qaybta barafka (diepvries). Qabawgu fayraska ma dilo. Waxa intaa dheer in maaskaradu cunnada ay fayras kaa qaadiin karto.


Maaskarada afku waxa ay faaiido leedahay kaliya in aad isku mar tilmaamaha aasaasiga ah ee kalena aad raacdo:

- lilaali masaafad dhan 1.5 mitir
- ku dhaq gacmaha si joogto ah biyo iyo saabuun
- ha taaban wajiga
- qufaca iyo hindhisada u dhig xusulkaaga
- xiriirka bulshada yaree
- hadii aad xanuunsanayso joog gurigaaga

SIDEE LOO XIRTA?



Maaskarada inta aanad taaban ka hor, gacmaha sifichah biyo iyo saabuun ku dhaq.



Ha taaban qaybta gudaha ee maaskarada.



Maarka aad xiranayso maaskarada qabo xarkaha oo madaxa xagadambe uga xiro.



Hubi in maaskaradu sida ugu macquulsan wajigaaga ugu xirmayso. Dabool sanko, afka iyo garka.

SIDEE LA ISAGA SAARAA?



Maaskarada inta aanad iska saarin ka hor, gacmaha sifichah biyo iyo saabuun ku dhaq.



Ha taaban wajiga.



Marka aad iska furayso, qabo kaliya xarkaha maaskarada.



Marka aad guriga timaado ku dar maaskarada isla markiiba dharka la dhaqayo. Ka dibna gacmaha sicusub u dhaqo.

